QALAH SECONDARY SCHOOL

- Fanka waxa bilaabay **Cabdi sinimo ,** waxaanu ka bilaabay **AWDAL** waxaanu bilaabay **1940** heestii ugu horaysayna waxa ay ahayd
  - ✓ **Balwooy hooy balwooy**
  - ✓ **Waxa I beleeyey mooyaaneey**
  - ✓ **Balwooy hooy balwooy**
  - ✓ **Waxa I beleeyey baabuure**
  - ✓ **Balwooy hooy balwooy**
- Waxaana sii horumariyay kooxdii lagu magacaabijiray **Kaba cad ,** oo ahaa shaqaalihii ingiriiska
- In hees lagu luuqeeyo waxaa bilaabay alle ha u naxariistee **c/lahi qarshe** iyo **guroon jire**
- Riwaayadii ugu horeysay waxa sameeyay alle ha u naxariistee **Barkhad cas** , waxaana la odhan jiray **ina sabool**
- Riwaayadii labaad waxa curiyey **Xuseen aw faarax {dubad}** waxaana la odhan jiray **Isaseeg jaceyl**

BOQORKA MAANSADA {GABAY}

- Gabaygu waa bad ka mida baddaha maansada
- Gabaygu waxa kuu ka kooban yahay **laba dhudood** oo la yidhaahdo **Hooris iyo hoojis**
- Gabayga soomaalida **hooris** ka ayaa ka badan **hoojiska** , gabayguu wuu **laba dhacaa , sadex dhacaa , afar dhacaa**
- waxa loogu bixiyey **boqorka maansada**
  - ❖ waa ka ugu adag wax la tiriyo
  - ❖ waa kii ugu horeeyay wax la tiriyo

ADEEGSIGA GABAYGA

- waxa loo adeegsadaa :
  - ❖ Wajiga nolosha
  - ❖ Guubaabada
  - ❖ Hanjabaada

MIISAANKA MAANSADA

- Waa daahfurka balaadhan oo laggu sameeyay maansada soomaalida

QALAH SECONDARY SCHOOL

- Waa kasmo iyo aragti iyo aqoon ku dhisan oo uu si hufan ugu naqdiyey abwaankii waynaa ee **Maxamed Xaashi dhamac «{Gaariye}**
- Abwaan waxa uu ka qayb libaax le ka soo qaatey guulihii laga dhaxley kacaan kiii soomaliyeed ee ahaa **qoraalka afka iyo soomaali weynta**
- Dadaalada ka dib waxa uu **gaariye** xil iska saaray inuu maansada soomaalida **xeerar iyo quwaaniin** qabadsiiyo sida kuwa caalamiga ah , isagoo si taxane ah ugu soo bandhigi jirey **warfidiyeenkii xidigta October 1979**

1.JIIFTO =9

- ✓ Sida geed caleenloo
- ✓ Ubax guudka qariyoo
- ✓ Oo gooni laamuhu

2.MAROODI CADHOOLE 8

1. Hargaysi ma toostay
2. Hogaanka ma diiday
3. Harqoodka ma tuurtey

3. ABTIGAA MA FULAA :8

- ✓ Ubaxeey ubaxeey
- ✓ Indho yaab badanaa
- ✓ Kuggu soo ururee
- ✓ Maxay kaa uriyeen

4.LAAGO –LAAGO :7

1.waa laan cuseyba
2. O ciiro fuushey
3.waa ciil dadwayne
4. Cunug laga sameyay

5.SHUBAAL > 7

- ✓ Sool inaad tagi
- ✓ Sodan inaad qadi
- ✓ Oo sagaal dhixi
- ✓ Ood sidii noqon

6. HAANTA >10

1. Nin saluugey muuqiisa
2.Ama suufey maankiisa
3.Ka salkacay xaqiiqdiisa
4.Qabku saami ladha maaha

7.BAAR-CADE >10

- ✓ Kadaana nagbaa yaqaan
- ✓ Udaa cidbaa taqaan
- ✓ Ka dooro adaa yaqaan
- ✓ Ta doora allaa yaqaan

8.SALSALKA>10

1. Suleekhaay aragaagu
2.Nafta waa u samirsiisoo
3.sadexbey ku qadaaye
4.Ha kala goynin salaanta

- **MACAAN IYO QADHAADH** waxa tiriyey **Axmed ismaciil diiriye {Qaasim}**

DULUCDA GABAYGA

- ✓ In qofkas ta ooo baani aadan ahi uu leeyahay in wanaagsan iyo in xunba
- ✓ In gabyaagu waayaha uu la kulmi ka reebo
- ✓ In gabyaaggu si fudud waxa uu doonayo inoogu gudbiyo

- **OROD XOOGSO** waxa tiriyey **Ismaaciil mire cilmi 1860—1960**

DULUCDA GABAYGA

- ✓ In gabyaagu yahay guubaabiyaha bulshada uu afkooda u hadlaayo
- ✓ In gabyaagu si hufan oo fudud oo uu wax u doonaayo inuu u gudbiyo
- ✓ Qiimaha iyo karaamada shaqadu u leedahay qofka
- ✓ Tacabka iyo dadaalka balaadhan ee waalid ku inuu yahay deyn ay waajib tahay inaan celino

- **AMBA-QAAD HEES** waxa tiriyey **Siciid Saalax ahmed {sulub}**

DULUCDA HEESTA

- ✓ Kaalinta hees hawleedku kaga jirey nolosgha dhaqan dhaqaale ee somalida
- ✓ In ay nahay bulsho xoolo dhaqato reer guuraaaya
- ✓ Iney aqoontu tahay furaha nolosha aadamaha
- ✓ Iney soomaalidu taghay bulsho 100% islaam ah

- **MACALINKA GABAY** waxa tiriyey **X.Aadan ahmed afqalooc** sanadkii **1974---1975**
- Abwaan **x.Aadan afqalooc** waxa uu dhashay **1860** waxaanu dhintey **1986** isaga oo ah **126**

DULUCDA GABAYGA

- ✓ Qiimaha uu macalinku leeyahay iyo tixgalinta uu mudan yahay
- ✓ Kaalinta aqoontu kaga jirto hour kaca Aadamaha
- ✓ Sida aqoonta lagu kasbado
- ✓ Akhlaaqda iyo sida ardeyga looga baahan yahay

- **CILMIGU WAA IFTIIN** gabaygan waxaa tiriyey **Ahmed Colaad Digaale**

DULUCDA GABAYGA

- ✓ Qiimaha cilmigu leeyahay = Guusha iyo horukaca aqoonta laga helo
- ✓ Dheefta iyo faaiidada cilmiga laga dhaxlo =hooga iyo dib u dhaca jaahilnimada

- **AMAANTA RIYAHA** waxa tiriyey **Ismaaciil ahmed Barre** oo ku noola magaalada **gar adag**

DULUCDAGABAYGA

- ✓ Dheefta iyo faaiidada riyaha
- ✓ Inaan riyaha la kala dhicin
- ✓ Iney ka taran badan yihiin geela
- ✓ In haragooda sibraar laga samayn jirey

- **GEELA GABAY** waxa tiriyey **Xasan Maxamed yusuf {x. tarabi}**

DULUCDA GABAYGA

- ✓ Dheefta iyo faaiidada geelu u leeyahay soomaalida siiba cadkiisa caanihiisa , habeediisa iyo saxaradiisa
- ✓ Adkaysiga uu u leeyahay cimilada qalafsan iyo deegaanka abaarta xiga ee Somali
- ✓ Dhiiga iyo dhaggarta sida uu u baajiyo
- ✓ Sharafta uu u mihiimsiiyo qofka leh

- **WAANO GABAY** gabaygan waxaa tiriyey **C/lahi guuleed xeraad {dhuux wayne}**

DULUCDA GABAYGA

- ✓ In wadanka horumarkiisa meel looga soo wada jeesto
- ✓ In la ilaaliyo lagana faaidaysto khayraadka dalka gudihiisa
- ✓ in la iskaga tago qabyaalada iyo waxa dadka kala dila

- **WACDI GABAY** gabaygan waxaa tiriyey **Salaan maxamed xirsi {salaam carabeey}**

DULUCDA GABAYGA

- ✓ In aan aduunka lagu waareyn
- ✓ In aakhiro loo shaqaysto
- ✓ In wakhtiga nolosha laga faaidaysto